

Kooxaha ka tirsan Wajiga 1a ee qorshaha tallaalka ee Maamulka Caafimaadka Oregon ayaa hadda heli kara tallaalka.

Shaqaalaha daryeelka guriga, shaqaalaha taageerada shakhsiyeed, iyo shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed, oo ay weheliyaan dadka ay taageeraan, ayaa u qalma in ay tallaalada hadda ka helaan xarumaha caafimaadka ee tallaalka gobolka oo dhan.

Degaannada badankooda Mas'uuliyiinta Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka (LPHAs) ayaa la shaqeynaya xafiisyada degaankaaga si looga wada xiriiro macluumaadka ku saabsan tallaalada soo socda. Xafiisyada degaanka, sida CDDP aad leedahay, Hay'adaada, iyo APD/AAA, ayaa wadaagi doona macluumaad ku saabsan xarumaha tallaalka marka uu yahay mid la heli karo. Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon ayaa si toos ah kuugula soo xiriiri doona email ahaan iyo warbaahinta bulshada marka aanu hayno macluumaad ku saabsan xarumaha caafimaadka ee ee bulshooyinkaaga.

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan booqo goobaha Maamulka Caafimaadka Oregon ee ku yaala hoosta:

- [Tallaalka COVID-19 ee ka jira Oregon](#)
- [Su'aalaha inta badan la iska waydiiyo OHA ee ku saabsan tallaalka COVID-19 ee ka jira Oregon](#)

Fadlan halkan riix si aad [isku diiwaan geliso](#) una hesho macluumaadka cusub ee Guddiga Daryeelka Guriga.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. OHCC kala xiriir 877-867-0077 ama email u dir Xiriirada Macmiilka OHCC OHCC.CustomerRelations@dhs.oregon.gov.